



BE HEALTHY. BE SAFE. BE READY.

Barnaamijkan Waxaa Dhaqaalaha ku Caawiyey:

Minnesota State Fire Marshal



Waxaa wada-shaqeyn la sameeyey:

Waaxda Caafimaadka Minnesota
Golaha Ammaanka Minnesota
Xarunta Adeegga Waxyaabaha
Sunta ah ee Agagaarka Degmada
Hennepin

Waaxda Dabdamiska ee Spring
Lake Park – Blaine – Mounds View

Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan kaarboonka moono-ogsaaydh iyo dabsheegaha, booqo www.fire.state.mn.us

Si aad u hesho cajaladda dhiifiidhiiga barnaamijkan la soo xiriir
Rebecca.White@state.mn.us

Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan waxqabadka ECHO kala xiriir:

Lillian McDonald, *Executive Director*
c/o Association of Minnesota Counties
125 Charles Avenue, Saint Paul, MN 55103
651-789-4342
info@echominnesota.org
www.echominnesota.org

Kaarboonka Moono-ogsaaydh iyo Dabsheegaha

Dabsheegaha waxa uu badbaadin karaa waxyaabaha dadka ugu muhiimsan – noloshu iyo caafimaadka.

Qof kasta iyo qoys kasta waxaa noloshooda ugu muhiimsan ammaanka. Sidaas awgeed waxaa aad ugu sii muhiimsan in ammaanka guryaha loo sugo sida ugu wanaagsan.

ECHO (Emergency, Community and Health Outreach) waxa uu ku faraxsan yahay in la idiin soo saaro barnaamij taleefashin ah oo ka hadlaya sida loo sugo ammaanka guryaha ee ku saabsan dabka iyo kaarboonka moono-ogsaaydhka. Barnaamijkan oo ku baxaya siddeed luuqadood waxaa laga soo saari doonaa *tpt* Minnesota Channel:

Axad, 3-da Abriil:

Hmong 7:00 fiidnimo
Somali 7:20 fiidnimo
Karen 7:40 fiidnimo

Axad, 10-ka Abriil:

Lao 7:00 fiidnimo
Khmer 7:20 fiidnimo
Vietnamese 7:40 fiidnimo

Axad, 17-ka Abriil:

Spanish 7:00 fiidnimo

Af Ingiriis (Shaashadda ku qoran) 7:30 fiidnimo

Barnaamijkan waxaa dadweynaha lagu barayaa tillaabooyin fudud oo ay guryahooda uga nabadgeli karaan laba walxood oo loo dhiman karo oo kala ah kaarboonka moono-ogsaaydh iyo qiiqa sunta ah ee dabka la socda.

Barnaamijkan *Kaarboonka Moono-ogsaaydh iyo Dabsheegaha* waxaa lagu duubay siddeed luuqadood, waxaana laga heli karaa www.echominnesota.org iyadoo af Ingiriis lagu soo qorayo shaashadda si ay u akhristaan dad dhegaha la' iyo dadka dhegaha culus.

